



HOGHOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter | Bil'ly - Monthly |

Walaa Tirooduung ki jero

- Taariikdy Jamaa'atha Baardheere (1-2)
- Doodhis (maghy ing surung) (2-4)
- Magmaag (4-5)
- Dhaghanky (5)
- Manaahijta walbarashoothy Dowladda Federaalky (6)
- Wargiling (6)

Tifactory: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaalighy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhamang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.


Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeebtii 7aad Baardheere Historia= Baardheere History



Burburkii Baardheere (20 Sanno, 1835 -1854)

Jaama'atha Baardheere bilaawkii 1770 kii ilaa 1820 kii wey ky sifowdey Beled wiinathaaw oo ling weydiisithaaw barashithy diinty islaamky, ky dhaqanshee iyo deeghaan nebed eh. Laaking waktiyathii damby wey bilaawiteey shal deethishy maamulky markaas jerii oo sababeeng olaad iyo dareeng deeghaamy kaly galy oo jamaa'athaa ling araghi in jiritaanky maamulsho ii awoodiyo qatar ki ety.

Sithi hor hang sheegny ing Ulul-amrigi 3aad Sheikh Abiikar Eding Dhurry liky dili daghaalki Ombily. Sheikh Abdiramaan Abaayle Ulul-amrihii 4aad wey ing guurey deeghaanky Mansuur oo ky taaly konfurty Baardheere qiyaas 40 km. Isly markaas weybaa koraayeey omboo siyaathayeey dhirif i isfaham laang ky dha jetii qabiilee deghaayaang Bay, Bakool, Luuq, Afgoi (hulfathy) oo dhinighoo eh iyo Jamaa'atha Baardheere oo dhinighoo eh.



Hulufathay weybaa diidinaayeeny omboo ku masiirayeeny maamulki Jamaa'athy Baardheere iyo dhaqanky diinty islaamky oo sii fithaasy maynaa ku obsitheeny ini arlaadiyo amy hukungshoo saameyty.

Rung ahaantiiny fikirky i farriity Jamaa'atha Baardheere deeraasii dhulky hulufathy maamulaayeng, gaar ahaang gana'asighy bersheey sithy tubaakithy ii fool maroothighy oo Jama'athda reebty ku ganaasithoowshoo. Jamaa'ada may amarteeey inii sakaathy ly dhiby. Wey kaloo reebteey fusuqy, way amarteeey ing lis astury, dheel bilaang i meghel isly dheelayaang wal reeby iyo fasahaadkii noo kasty haayii oo semenkaas jirii oo dhong.

Arimooghung dhong iyee way ku hor kooyeeny danty ulumaathii bershoo, tujaarti, Salaadiinty, mathiithy qabiilee iyo ul-gathuudy. Hulufathy waybaa is tuseeny ing awoodiyo meely ku bahaasy hoo Jamaa;atha Baardheere liing hor roogsine. Taly i shoor bathang ku reed waybaa goo'aangsitheeny ing Jameeatha Baardhere lyky duulo. Abaabulky duulaangky waybaa hormood ku haayeey Saldanadii Afgoooy oo hogaamiyaayi Yusuf Mahamud. Muddy dheer ilaa 4 sanny iyee iniis diyaariyaayeeng. Way dad i hooly luku aruuriyeey Afgoi ilaa Luuq inty ing dhahooyto. Way liky qiyaaseey iithingky ki dullaww Baardheere ilaa 40,000 (afartung kung) qof oo eed ing hubeysing.

Dulaanky wiing way bilaawitheey qiyaastii sanadkii 1251 Hijriya oo ky eeding 1935. Jamaa'atha Baardheere iyeetho dhibkii Ombily ha deeri wili hangku kabsane eedny diyaar iniing haayne iyee duulaang jihiyaal bathang lahangku qaathi. Saas etiny eethaa iniisku reebeeng marki hore. Iyeeedo lis mary waaysinyi iyee webighi hegsheey liinky kooyi oo dad bahaaringi eh adowky ing fududaayeng. Dagaalky eethaa liinky dhammaathy. Sheikh Abdirahman Abaayle iyo kaaliyisheey Sharif Ibrenge meela liky dili. Dad walaagi ling dilne shal fariireeng. Weybaa li qiyaaseey ilaa shan kung qof ky naf waaty.

Jameeada Baardheere dhib eed ing wiing iyee deeri oo iniisky jero burbur naf, maal iiyo degaanby. Beledky Baardheere kulisheey, marki luku reeby buuliyaalky, wal guby, waybaa ly sheegheey ini beledky gubuthaayi muddy bil eh. Sithaas iyee Baardheere muddy 20 sanny ky naghathi meel duur eh oo dad ing deqenaayny. Way kaloo ly sheegey ini beledky dhatiis liky duughi dubi 2 jir eh, si ebedshee reed hanky noolaanee omboo liing degne.

Dadky fariiry oo dagaalky ku badbaathi ay ku mid haayeey Sheikh Mad Eding Keerow oo markaas kuruy yar haayi. Usii labaatung sinni ku ba'addi sabab ing naghathi ing Jamaa'atha Baardheere reed liingky aasaaso sithii haatii haky naghathi sannadky 1271 hijra (1854). Ly dareer qaybty 8aad

Diyaaring: Omar Abdulqaadir Sh. Abdirahman

Qeepoo Dooghy: Qiib ku mid eh Doodhisky Afky Maayky (En del av Somaliska Maay Grammatik/Part of Somali Maay Grammar)

Maghy ingsuruang Tilmaamy - Maghy ingsurung lahaangshy

Af-Maayky sity luqathoo kale may leyaa Maghy ingsurung tilmaamy (demonstrative pronomen/Pronouns) i maghy ingsurung lahaangshy (Possessiva pronomen /Possessive pronouns).

Maghy ingsurung Tilmaamy – Demonstrativa pronomen – Demonstrative pronouns

Magahy ingsurungky tilmaamyiggy ee Af Soomaalighy (Maay iyo Maxaa) wey ing shalbaheey lab (male), dhedig (female) i wathar (plural) walaa li tiulmaamaaw haatheeng wal madaas la araghaaw ama wal liing araghaane oo moqong. Maghy ingsurungky Tilmaamy ee Afafky Ingiriisky i Swedishky mi shal biyaaw lab iyo dheddig.

Tusaale: Maghy insurung tilmaamy ee Af Maayky may ku mid ahaa: **kang, tang, kaas, taas, haang/haanuung, haanaas (den här, den där, det här, det där/ this ,that, these, those)**.

Tusaale: Maghy ingsurungky tilmaamy Af Maxaa tiriggy may ku mid ahaa: **kan, tan, kaas, taas, kuwan, kuwaas (den här, det här, den där, det där, de här, de där - this, that, these, those)**.

Magy Insurung tilmaam Soomaali Maay, Soomali Maxaa, Svenska iyo English

Af-Maay- Somaliska			Af-Maxaaa- Somaliska			Svenska	English
lab-keli	dhedig-keli	Wathar	lab-keli	dhedig ig keli	wadar	-	-
kang	tang	haang/haanuung	kan	tan	kuwan/ kuwaan	den här/det här/de här	this/these
kaas	taas	haanaas	kaas/kaa	taas	kuwaas/ kuwaa	Den där/det där/ de där	that/ Those
Af-Maay- Somaliska			Af-Maxaaa- Somaliska			Svenska	Engelska
Tilmaang wal qofky dowahaaw i qofky lili dowahaaw iniisly kasaane iyo wal isly kasaayaang							
koo	too	haanoo May isly kasaaw	koo/mid/ midkoo	too/midoo	kuwoo	-	-
kii	tii	haanii Wal isly kasee	kii/midki i	tii/middi	kuwii	den där/det där/de där (du vet)	that/those

FG: koo, too, haanoo, kuwoo; qofky dowahaaw iyo qofky lili dowahaaw isly gorothaayaang.

Kii, tii, haanii, kuwii; qofky dowahaaw iyo qofky lili dowahaaw misly gorothaayaang.

Tusaaly:

1. kaas iing sheeng – kii ii keen – hämta mig den där – giv me that. (You know these things)
2. hang/haanuung athii aangteey? Kuwan adiga maa/miyaa cunay? Har du ätit de här? Have you eaten these?
3. Tang maallingwu; Tani waa macallimad – den här är lärare - This is a teacher.
4. Hanii ma koony shuqulka. Kuwii ma imaanin shaqada – de där kom inte arbetet. Those didn't come at work.

**Maghy insurung lahaangshy – Magac uyaal laahaansho - Possessiva Pronomen Possessive Pronouns
(Somaliska – Maay och Maxaa, Svenska/English)**

							Svenska/English Possessiva pronomen Possisive Pronouns
	Af-Maay lab – keli mask.sing	Af- Maxaa lab-keli mas. sing.	Af-maay dhed.keli fem. sing,	Af-maxaaa dhed.keli fem.sing	Af-Maay Wathar	Af-Maxaa Wadar	
1st sg.	kiikey	kayga	tiitey	teyda	haaneey	kuwayga	min, mitt, mina/mine
2st sg.	kiikaa	kaaga	tiitaa	taada	haanaa	kuwaaga	din, dit, dinna / yours
3 sg. m.	kiisheey	kiisa	tiitiis	tiisa	haaniis	kuwiisa	hannes, dess/ his
3 sg. F.	kiishee	keeda	tiitiyee	teeda	haaniyee	kuweeda	hennes, dess/hers
1 pl.exkl.	kiikaany	kayaga kaayaga	tiitany tiitaany	tayada taayada	haankeen haankany	kuwayaga	vår, vårt, vara /ours
1pl. inkl	haankaany	keenna	tiitaany	teenna	haaneeng	kuweena	vår,vårt våra/ ours
2 pl.	kiikiing	kiinna	tiitiing	tiina	haaniing	kuwiina	er, ert, era /yours
3pl.	kiishoo	kooda	tiitiyoo	tooda	haangshoo	kuwooda	deras/theirs

FG. sg= singular (keli), m= male (lab), f= female (dheddig), pl= plural (wadar). Exkl. excluding , inkl= including.

Tusaaley:

1. Kang kiikeywu. Kan waa keyga. Den här är min. This is mine.
2. Guriguun kiikaaynuwu – Gurigaaan waa keenna. – Det här är vårt hus. - This house is ours.
3. Dukaankaas kiisheewu. Dukaankaas waa keeda. Den där är hennes affär. -That is her shop.
4. Wangtuun haanshoo. Caanahan waa kuwooda. Denna mjölk är deras. This milk is theirs.

Diyaaring: Abdulkadir Abukar Sheikh-Dhaalib, Afmaay Development Center/Örebro Sweden.

Raad Rah/Raad Raac/Reference/Refers: Nilsson, M. (2018) – Somaliska - En Kontrastiv Grammatik för Modersmålstälare Göteborgs Universitet – Institutionen för språk och litteraturer - Sweden.

Magmaag (Ordspråk): Bakaar eebbeheey haruub my leh:

Magmaagduung may sheeghaasee ing siismeetha ama wal siyoowka Waaqa/Ilaaheey/Eebbe haruub/dapool iyoonaay jithingby ing lahaayne oo usku furunty maddii usu fatha, sithii usu fatha iyoonaay intii usu fathuby siyee uungsheey ii umutiis. Ilaaheey humaang, nusqaang ku dhoorsinaathi waana korreeyo bakaartiis wal daboolimaaw ku wiingty maddii usu wal maaghoona miing taagwaayaaw. Aaw Sheek Abdilla Isaak iyee maay arreey ”maagsheey weelky Alleew, maas miki lihine maag wal niing siyeew” Abwaang Sahal yee usuuny may arrey “Amar Eebe sheenaaw wiinyaa langny ood ma saaraa” Amar Eebena siismy ii diidmiba naghatha kore bakaartiisny ma dhamaathaaso sithii tang aaddingka haatoow maana dapooling omboo dapool malleh.

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh Abdurahman

Fasiraad: Abdullahi Sheikh Mohamed

Daghang (Kultur): Dalaga beeroo



Birqaab



Salbuky

Diyaaring: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dhaghngky Soomaalithy beraleeythy eh gaar hang koofur galbeed may ku mid ehaa inii yoo beerithaayaang dallaggy liing kasaaw Tingjhir/Diir/Dighir oo ing shal bahaaso Birqaab iyo salbuky. Tang gathuuthing wiiwiing Birqaab iyee le erre tang yar yar oo aghaaring Salbukii le erre. Lamaathy noo tingjhirty eetha nafaqy ing leyiing waana eetha liingku jeelyi Soomaaliya iyo addungkiby.

Dooqaadky Hoghol
Af-Maay Newsletter
Somaliska Maaytidskriften
E-Mail:
afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Baydhowa, Mogadishu, Sheikh Örebro

Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky
Hogol
Af-Maay Newsletter
Af-Maay Development Center (ADC)
Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Office: Baidoa, Sheekh, S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden

Afkeey i Dhaghangkeey sumudeeywu
Mitt språk och kultur är min identitet
My Language and culture are my identity

Wargiling

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayeeey walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hormariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:
Email. afmaaydevelopmentcenter@gmail.com



Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Development Center (ADC)
c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige Föreningarnas Hus
Slottsgatan 13A, 70361 Örebro, Sverige

E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com
Website: www.sydvastomaliska.org

Manhaj Jangjeero

Manaahijta Walbarashootha Dowladda Federaalky mi dheellitiring.

1- Buugaagty Af Soomaalighy iyoonaay Taariigdy Mahaa tirileey ky qoronyiing

2- Gopolee koofureed afshoo, taariigdiyoo iyo dhaghanshoo ku moqonyiing buugty taariikdy iyoonaay haang af Soomaalighy addaala dorruwaa hal sahooy

AMDC



Dooqaadky Hoghol- Hoghol Af-Maay Newsletter (2021)